San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilliga Dayrta 2002

Jawaab-celinta Xaaladaha Degdegga ah

Sannadkii 1999 kii sharci ka soo baxay California ayaa wuxuu farayaa in maamule kasta oo dugsi uu soo qoro, isla mar ahaantaasna, xafido Qorshaha Nabadgelyada Dugsiga. Booliiska ka Shaqeeya Dugsiyada ayaa waxay tababar ku saabsan nidaamka xaaladaha degdegga ah looga jawaab celiyo u fidiyaan dhammaan maamuleyaasha dugsiyada. Cajalado muuqaal iyo maqalba ah (fiidiyo) ayaa la soo saaraa, waxaana loo qeybiyaa si tababar loogu siiyo dhammaan shaqaalaha cusub ee dugsiyada.

Sannadkii 2000, ayey Adeegyada Booliisku waxay dugsi kasta iyo dhammaan meelaha carruurta lagu xanaaneyo ka hirgeliyeen **Sanduuqyada Xaaladaha Qallafsan looga Jawaab-celineyo (CRB). CRB** kasta waxaa ku jira qorsheyaasha nabadgelyada dugsiyada ee lagaga jawaabeyo marka ay xaalad degdeg ah timaado, maamulaha dugsiga ayaana sanduuqaas haya. Haddii ay xaalad degdeg ah dhacdo, maamulaha dugsiga ama qof kale oo loo tababarey ayaa sanduuqaas fureya, wuxuuna raacayaa nidaamka **CRB** sida uu dhigeyo.

Maamulaha dugsiga iyo xafiiska adeegyada booliiska waxay sannad kasta dib-u-eegayaan qorshaha nabadgelyada ee dugsiga loo dejiyey. Koox ka kooban maamulaha, maamule ku-xigeenka, macallimiinta, ardeyda iyo laba (2) waalidiin ah ayaa dib-u-eega, kedibna qorshahaas wixii sixitaan ee uu u baahan yahay ayey ku sameeyaan. Hal nuqul waxaa lagu keydiyaa **CRB** ee xaaladaha degdegga ah, kuwa kalena waxaa la dhigaa miiska xafiiska dhexe ee dugsiga si ay waalidiinta iyo shaqaaluhu dib-igu-eegaan. Qof kasta oo waalid ama ilmaha ka masuulka ah waxaa loo oggol yahay inuu dib-u-eego qorshahaas nabadgelyada, wuxuuna wakhti kasta ra'yigiisa ama aragtidiisa arrintaas ku saabsan u gudbin karaa maamulaha dugsiga.

CRB kasta waxaa ku jira Tilmaame Dhakhso loo Daalacdo ee Xaaladaha Degdegga ah, ardeygu wuxuu taxaa liiska magacyada oo u kala qeybsan heerka fasalka, khariidadii ugu dambeysay, qorsheyaasha masiibada, marinada sida degdegga ah looga baxo, meelaha la kore ee la istaago, dhismaha oo hawada kore laga soo sawiro, macluumaadka dembiyada, iyo warbixinada kale ee la xidhiidha ee sharcigu u baahan yahay.

OO KOOBAN

- **Ahmiyada koowaad ee Booliiska Dugsiyada iyo shaqaalaha dugsigu waxaa weeyaan inay dhammaan ardeyda iyo shaqaaluhu nabadgelyo helaan.**
- **Marka ay dugsiga xaalad degdeg ah ka dhacdo, meelaha ardeyda ugu badbaado badani waa aaga dugsiga inay joogaan.**
- **Waalidiintu waxaa looga baahan yahay inay is dejiyaan.**
- **Waalidiintu waa inay had iyo jeer sitaan nambarka dugsiga ee ilmahooda.**
- **Waalidiintu waa inay nambarka telefoonka gacanta ee cusub hadba la socodsiiyaan dugsiga si looga soo waco marka ay xaalad degdeg ah timaado.**
- **Qalabka warbaahinta ayaa loo isticmaaleyaa in waalidiinta iyo jaaliyada loogu sheego aaga dib loogu kulmeyo iyo tallaabooyinka ay tahay in la raaco ilaa telefoon lagu wici karo waalidiinta.**
- **Marka ay xaalad degdeg ah oo jaaliyada oo dhan saameysa ay dhacdo, warbaahinta ayaa loo isticmaali doonaa inay soo daabacdo khad telefoon oo ardeyda iyo waalidiinta su'aalahooda looga jawaabo.**

Hadba iyada oo ay ku xidhan tahay sida ay xaaladaha degdegga ah yihiin, waxaa maamule kasta laga rabaa inuu magacaabo laba meelood oo aaga ka baxsan ardeydana lagu hoggaamin karo inay tegaan haddii loo baahdo. Ardeyda waxaa kormeer ku sameynaya laba qof oo shaqaalaha ka mid ah oo loo tababarey maareynta xaaladaha degdegga ah, ardeydana looma oggola inay iska tegaan iyaga oo aan dugsiga fasax ka helin. Dib-u –kulmidu waa habka ardeyda loo sii daayo inay u tegaan waalidkood ama dadka ilmaha ka masuulka ah ama loo fasaxo inay dugsiga dib u soo galaan marka loo arko inuu aagu nabadgelyo yahay. Hada waxaa jira shaqaalaha waxbarashadda degmada qaar ka tirsan oo loo tababarey inay yihiin Kooxaha Dib-u-kulmida, kuwaas oo loo yeedhi doono inay dugsiga soo galaan, oo dib-u-kulanka ardeyda u kala habbeeyaan heerka fasalada. Marka ay arrintu halkaas mareyso waxaa waalidiinta laga rabaa inay saxiixaan foomka carruurta dugsiga lagaga sii deynayo. Haddii ay xaalad degdeg ah dhacdo, qalabka warbaahinta ayaa loo isticmaaleyaa in waalidiinta iyo jaaliyada loogu sheego aaga dib loogu kulmeyo iyo tallaabooyinka ay tahay in la raaco ilaa telefoon lagu wici karo waalidiinta.

Maamuleyaasha, maamule ku-xigeenada iyo shaqaale kale oo la magacaabey ayaa la siiyey tababar ku saabsan siyaabaha loo wejeho marka ay xaalad degdeg ah timaado. Tababarkaas waxaa ka mid ah u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah, dhibaatooyinka iyo maareynta dhacdooyinka adag, tababarida shaqaalaha ee hirgelinta qorshaha nabadgelyada, qiimeynta waxyaabaha khatarta leh ama laga cabsi qabo, meelo ka bixinta ama banneynta iyo hababka la raaco ee dib u kulmista. Marka uu dhammaaneyo sannad-dugsiyeedka 2003, Adeegyada Booliisku waxay sagaal (9) dugsi u dooran doonaan si qori-tuur ama nasiib ah, si ay ugu tijaabiyaan una qiimeeyaan sida ay diyaarka ugu yihiin xaaladaha degdegga ah. Warbixin ayaa laga qori doonaa taas oo tallooyin lagu siineyo meelaha loo baahan yahay in la hagaajiyo.

-wey socotaa-

Somali Version: Emergency Response

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilligii dayrta 2002, waxaa la bilaabey **Xarunta Xaaladaha Hawlaha Degdegga ah (EOC)** oo ku salleysan heerarka dawlad-goboleedka. EOC waxaa la sameeyaa marka dugsiga ama degmada aag ka mid ah laga baxayo ama la banneynayo. Ujeeddada laga leeyahay waxaa weeyaan in la iskuduwo, lalana socdo ogeysiintii waalidiinta iyo dadka ilmaha ka masuulka ah la siiyey, waxaa ka mid ah in xidhiidh wada shaqeyn ah oo adag lala yeesho magaalada, gobolka, dawlad-goboleedka, iyo ha'aydaha dawlada-dhexe.

Waxaa iyana dadaal dheeraad ah muujiyey Adeegyada Caafimaadka, Adeegyada La-talinta iyo Hagitaanka, Maareynta Khataraha, Machadka Waxbarashadda, Waaxda Xidhiidhada iyo Jaaliyadaha, iyo Hawlgalka Waalidku waxay sameeyeen isbedelo isdabajoog ah iyo siyaabaha xaaladaha degdegga ah loogu diyaargaroobeyo oo la hagaajiyo.

Adeegyada Waaxda Caafimaadka waxay casriyeyeen, isla mar ahaantaasna hirgeliyeen **Qorshaha Dhexgelista Dhibaatoyinka.** Waxay bixiyaan siyaabo habbeysan oo looga jawaabeyo marka ay dugsiyada iyo degmada dhibaatooyin ka dhacaan. Marka ay wax dhacaan dhexgelista dhakhso ah iyo warbixinada dhabta ah waxay muhiim u yihiin taageerista dadka waxyeeladu ay soo gaadhay iyo ku soo laabashadda dugsiga marka ay hawluhu caadi ku soo noqdaan.

DCRT – Kooxda ka Jawaab-celisa Dhibaatooyinka Degmada waa koox si aad ah loogu tababarey Maareynta Xaaladaha Walaaca leh ee Adag, kaas oo ardeyda, shaqaalaha iyo jaaliyada loogu tababarey inay ka caawiyaan arrimaha jaah wareerka leh. Marka ay xaalad degdeg ah timaado, Kooxda ka Jawaab-celisa Dhibaatooyinka Degmada ayaa loo adeegsaneyaa inay dugsi kasta ka caawiso marka ay dhibaatooyin la soo dersaan.

CRT dugsiga –**Kooxda Dhibaatooyinka ka Jawaab-celisa** waa meelaha ugu horreeya ee lala xidhiidho, warbixinadana laga helo. Maamule kasta ama qofka kale ee la magacaabey wuxuu masuul ka yahay inuu maamulo **CRT.** Dhammaan maamuleyaasha waxaa lagu amreyaa inay sameeyaan qorshaha dhexgelista inta uusan aaga wax ka dhicin, kaas oo sharaxaya tallaabooyinka in la raaco ay habboon tahay marka ay dugsiga dhibaato ka dhacdo.

Waaxda La-talinta iyo Hagitaanku waxay kaalmooyin iyo macluumaadba u fidiyaan waalidiinta iyo carruurtooda. La-taliyaasha dugsi kasta loo magacaabey waxay kaloo xubno lagama maarmaan ah ka yihiin Kooxda ka Jawaab-celinta Dhibaatooyinka Aaga.

Haddii aad is leedahay ilmahaagu wuxuu u baahan yahay la-talin iyo hagitaan dheeraad ah, waxaad marka koowaad wacdaa la-taliyaha dugsiga uu ilmuhu dhigto. Waxaad la sameysataa ballan ama jadwalka wakhtiga aad rabtid inaad arrimo kala hadashid. Wey kula talin doonaan, haddii loo baahdana waxay kuu direyaan ha'ayado kale.

Waxaad xusuusnaataa in hadba sida aan u dhaqano uu jawiga xaaladaha degdegga ah wax ka qabaneyo. Deganaansho iyo hubsiimo.

Marka ay xaalad degdeg ah dhacdo, ilmahaaga la hadal, waxaadna u sheegtaa:

- Inkastoo ay xaalad degdeg ah jirto inay nabadgelyo helayaan
- San diego waxay kordhisey heerarkii nabadgelyada
- Waxaa la kordhiyey heerarkii wax looga hortegayey inta aysan dhicin
- Waxaad xusuusisaa in dhammaan boogaha uu wakhtigu bogsiiyo

Waxaad xusuusnaataa:

- **Inaad wax kaalmeysid, shakigana ka saartid**
- **Inay carruutu dareenkooda kuu sheegaan**
- **Inaad noqotid dhegeyste wacan, aad dareenka carruurtana ogaatid**

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Somali Version: Emergency Response

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.